# Geedka Sunta ah ee Hemlock

## Poison Hemlock

### *(Conium maculatum)* Ka Tirsan Qoyska Parsley

**Cawska Sunta ah ee wali Xeerka loo Samayn ee Heerka B: Xakamayn ayaa la soo Jeedinayaa**

## Tilmaamo lagu Aqoonsado

- Waa geed dheer oo ku baxa laba sano, isagoo gaara 8 ilaa 10 feet sanadka labbaad
- Wuxuu leeyahay, caleemo cagaar ah aan ubax lahayn oo leh, ur aad u daran
- Sannadka-koowaad geeduhu waxay sameeyaan caleemo kooban oo guduudan oo isku urrursan oo dil dilaacyo leh ama jirido dhibco yaryar leh
- Sannadka-labaad jiridu waxay noqotaa mid buuran, duleesha, aan timo lahayn, wareegsan, guduud oo kale ah ama leh dhibco yaryar oo madow oo khafiif/xar xariiq
- Geedaha ubuxu ka soo baxo waxaa dusha ka fuula ubaxyo yar oo caddaan ah oo dalada u eg oo shan qaybood ka kooban
- Iniinyuhu waxay sameeyaan dabool dhuuban, oo cagaar ah oo ugu dambayn isku beddela midab cawlan



*Geedka sunta ah ee hemlock wuxuu leeyahay caleemo cagaar ah oo dhallaalaya, aan ubax lahayn oo leh ur aad u daran.*

## Bayoolajiga

Iniinyaha ayaa dib u soo saara. Sannadka-koowaad wuxuu yeeshaa wax ubaxa u eg; sannadka-labaad, wuxuu sameeyaa jirido dhaadheer iyo ubax. Wuxuu aad u koraa Maarso ilaa Maajo, wuxuuna ubaxa bixiyaa dabayaaqada guga. Ilaa 40,000 iniinyo ayuu geedkiiba soo saaraa. Iniinyuhu waxay ku dhacaan geedka agtiisa waxaana qaado nabaadguurka, xayawaanka, roobka, iyo dhaqdhaqaaqa dadka. Iniinyuhu waxay awood u yeeshaan in ay noolaadaan ilaa 6 sano iyagoo soo biqla wakhtiyada wax la beerto; mana jiro jirto wakhti aanay baxaynin.



*Adag, jiridiisa aan timaha lahayni waxay leedahay dhibco yaryar ama wax isku xiriirsan oo midab guduud-madow khafiif ah.*

## Saameynta

**Waxayna sun aad u daran u keenaan xoolaha, dadka; isagoo sababa dhimasho ay keento hawlgab ku dhaca habka neefsashada ka dib marka afka laga qaato.** Marka uu aadka u baxo wuxuu bara bixiyaa dhirta la rabo. Bixitaanka uu baxayo horraanta guga waxay ka dhigtaa in ay xayawaanku cunaan marka aanu jirin caws kale. Waxaa lagu qaldi karaa karootada marka uu yar yahay.

## Faafidda

Waa noocyo ka soo jeeda Yurub-Aasiya, soo si aad ah looga helo Waqooyiga Ameerika. Wuxuu aad ugu baahsan yahay Degaanka King; isagoo laga helo wadooyinka agtooda, webiga hareerihiisa, togaga, dhulka banaan, godadka, barxadaha aan la daryeelin iyo guryaha maran. Wuxuu jecel yahay carrada qoyan iyo qoraxda, wuxuuna la qabsan karaa carrada qalalan iyo marka mugdigu jiro.



*Kooxo ubaxyo ah oo yar oo caddaan ah oo shan qaybood ka kooban ayaa soo muuqda dabayaaqada gu'ga.*

## Maxaad Samayn Kartaa

Geedka Sunta ah ee Hemlock waxay aad ugu baahsan tahay Degaanka King in la xakameeyana looma baahna, laakiin geedkani waa in la jaraa markasta oo ay suurto gal tahay, gaar ahaan meelaha u furan dadka, xayawaanka la korsado iyo xoolaha. **Dhammaan qaybaha uu ka kooban yahay geedku waa kuwo sun ah marka la cuno xataa qaybaha sida usha oo kala ahi waxay muddo ilaa saddex sano ah sii ahaadaan sun.** Mar kasta xiro dhar la isku illaaliyo (gacmo gashi, shaar gacmo dheere ah) marka aad ka shaqaynayso geedkan. **Haddii aad ka shakido in sun ku soo gaartay, si dhakhso ah taageero u raadso.** Dadka iyo xayawaanka labadoodaba, daaweyn degdeg ah ayaa beddeli karta saameynta geedka sunta ah ee hemlock.

## Hababka loo Xakamaynayo

### *Gacanta laga qabanayo:*

**Xiro gacmo gashi iyo shaar gacmo dheere ah.** Marka laga hadlayo goobaha yar, soo jiid ama soo qod geedaha. Xidida u soo jiid. Si buuxda gacmahaaga u dhaq ka dib markaad qabato shaqo la xiriirta geedka. Si uu saameyn u yeesho,

dhammaan geedaha qaangaarka ah waa in la soo bixiyaa si aanay u samaysmin iniinyo cusubi. In meesha hawshu ka socota lagu daro lakabyo waxyaalaha ka soo hara dhirta ah kadib marka la nadiifiyo ama dib loogu beerayo dhirta la rabo waxay yarayn doontaa soo biqlida iniinyaha geedka sunta ah ee hemlock ee carrada ku jira. Dhulka ha uga tegin madaxyada ubaxa iyadoo ay iniinyuhu sii ahaan karaan kuwo awood u leh in ay noolaadaan.   In la gubo talo ahaan looguma soo jeedinayo; halkii taasi laga samayn lahaa waxaad ku ridaa bacda qashinka lagu rido waxaanad ku ridaa qashin qubkaaga caadiga ah.

### *Farsamo:*

**Digniin: sun ayaa la nuugi/qaadan karaa marka la jaraya geedka sunta ah ee hemlock.** In la jaro talo ahaan looguma soo jeedinayo iyada oo ay sababtu tahay ku neefsashada sunta.  Intaasi waxaa dheer, dhirta la jaraa dib ayay u soo bixi kartaa.

### *Kiimikada:*

**Waxaad raacdaa astaamaha ku qoran adigoo kaliya isticmaalaya waxyaabaha ku habboon ama loo ogol yahay goobta. Kiimikada wax lagu buufiyo kaliya waxaa la isticmaali doonaa qiyaasaha sida gaarka ah ugu tilmaaman astaamaha.** Buufi caleemaha (caleemaha iyo jirida) wakhtiga gu'ga, taasi oo ay soo raacdo mar kale oo la isticmaalayo wakhti dambe oo ka tirsan xagaaga ay gadaal ka soo biqlayaan. Dhirta waxaad buufisaa intaanay ubaxa bixin si aad natiijo fiican u hesho. Waxaa suurto gal ah in buufinta la buufinayaa aanay ka horjoogsan soo bixida iniinta ee dhirta qaangaarka ah. Kiimikada gaarka ah ee wax lagu buufiyo oo leh waxyaabo aad u saameyn u leh ee triclopyr, 2,4-D ama metsulfuron si wanaagsan ayay u shaqayn karaan meelaha cawska leh. Waxyaabaha wax lagu buufiyo ee Glyphosate waa mid shaqaysa laakin keliya waxay si fiican u dishaa dhirta caleemaha waaweyn leh.  Ha soo goyn dhirta kiimikada lagu buufiyay ilaa ay ka dhimanayso. Iniinyuhu waxay soo biqlaan guud xilliyada kala duwan oo dhan, sidaa darteed buufinta la buufinayo waa lagama maarmaan si loo tirtiro dhirta. Hababka la kala dooranayo ee kiimikada lagu xakamaynayo way kala duwanaan kartaa marka laga hadlayo, dadka sida gaarka ah u isticmaala, ganacsi ahaan u isticmaala ama dowlad ahaan u isticmaala. Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah.

## Suuro galnimada in la isku qaldo:

**Karootada duurka laga helo ee (*Daucus carota*) iyo sidoo kale kooxaha kale ee ay isla mid ka yihiin ee ka tirsan qoyska parsley, oo ay ka mid yihiin dhirta loo yaqaan fennel, chervil iyo anise, waxay isa shabahaan geedka ee Sunta ah ee Hemlock.**

Karootada duurka laga helo waxaa kuwa kale lagaga garan karaa geedka sunta ah ee hemlock dhowr waxyaalood: wuxuu caadiyan baxaa oo gaaraa 3 feet; jirideeda cagaarka ahina waxay leedahay timo khafiifa oo leh laamo aan badnayn; iyadoo ubaxa soo bixisa dabayaaqada xagaaga.   Marka la isbarbardhigo, geedka sunta ah ee hemlock wuxuu dherer ahaan gaaraa 8 feet ama in ka badan; caleemihiisa waxay leeyihiin ur aad u daran; jiridiisa aan timaha lahayni waxay leedahay guntin/dhibco yaryar oo midab guduud oo kale ah ama madow khafiif ah.



*Karootada duurka laga helo (oo loo yaqaan Queen Anne's Lace) waxaa inta badan lagu qaldaa geedka sunta ah ee hemlock.*



*Geedaha yaryari waxay u eg yihiin karootada, laakiin **dhamaan qaybaha uu ka kooban yahay geedkani ee (xidida, jiridaha, ubaxa, iniinyaha, caleemaha) waa kuwo sun ah.** Xiro dhar la isku illaaliyo isla markaana si daryeel leh uga s haqee.*



*Wuxuu si dhakhso ah u qabsadaa meelaha bannaan, isagoo barakicinaya dhirtii faa'iidada lahayd.*



*Bilowga gu'ga, waxaad meelaha taaga ah ka raadisaa, caleemo dil dilaacyo oo midabkoodu yahay cagaar dhallaalaya. Marka caleemuhu ay aadka iskugu urursan yihiin markaa waa geedaha sannadka-labaad ku jira oo isku diyaarinaya in ay soo saaraan ubax markaa ka dibna soo saaraya iniinyo marka la gaaro dabayaaqada gu'ga.*

Sawirka karootada duurka laga helo waxaa qaaday Andreas Rockstein / CC BY 2.0.
Diiwaanka: NoxWfact-Poison-Hemlock-2018.indd